91. Waxaa uun Lay Faray inaan Caabudo Eebaha Baladkan (Maka) ee ah kan Xarrimay oo wax kastana iska leh, waxaana lay Faray inaan ahaado Muslimiinta.

إِنَّمَآ أُمِرۡتُ أَنۡ أَعۡبُدَ رَبَّ هَٰذِهِ ٱلۡبَلۡدَةِ ٱلَّذِي
حَرَّمَهَا وَلَهُۥ كُلُّ شَيۡءٖۖ وَأُمِرۡتُ
أَنۡ أَكُونَ مِنَ ٱلۡمُسۡلِمِينَ ٩١

92. iyo Inaan Akhriyo Quraanka Ruuxiise Hanuuna wuxuu uun u Hanuunay Naftiisa, Ruuxiise Dhuma waxaad dhahdaa Anugu waxaan uun ahay kuwa Diga.

وَأَنۡ أَتۡلُوَاْ ٱلۡقُرۡءَانَۖ فَمَنِ ٱهۡتَدَىٰ فَإِنَّمَا يَهۡتَدِي
لِنَفۡسِهِۦۖ وَمَن ضَلَّ فَقُلۡ إِنَّمَآ أَنَا۠ مِنَ ٱلۡمُنذِرِينَ ٩٢

93. Waxaadna dhahdaa Mahad Eebaa iska leh wuxuu idin tusin Aayaadkiisa oo Aqoonsanaysaan, mana aha Eebaha mid Halmaansan waxaad Falaysaan.

وَقُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ سَيُرِيكُمۡ ءَايَٰتِهِۦ فَتَعۡرِفُونَهَاۚ وَمَا رَبُّكَ
بِغَٰفِلٍ عَمَّا تَعۡمَلُونَ ٩٣

Eebe wuxuu Faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu Caabudo Ilaaha Magaalada Barakaysan ee Maka, ee Xurmeeyey, iyo inuu u Hogaansamo, Quraankana Akhriyo, Illeen Ciddii Hanuunta wuxuu uun wax u Taray Naftiisa, tii Dhuntana waxay uun Dhibtay Nafteeda.
Nabigana Waxaa uun Saaran u Digid iyo Gaadhsiin Xaqa, Mahadna Eebaa iska leh, Dadkana Tusin doona Aayaadkiisa si ay Xujadu u Qabato, wax uu ka Halmaansanyahay waxay Falina ma jirto, Magaalo walba Eebaa iska leh ee waxaa Maka loo Sheegay Sharafteeda. Waxaana Sugnaatay in la Reebay Goynta Geedaheeda, Dilidda Ugaadheeda, iyo Qaadidda Baadideeda, Cidaan Yaahdinayn. Si kastood tahayna Eebe waa ku Ogyahay.
Cumar Binu CabdiCasiis wuxuu Yidhi: Eebe ma Halmaamo xataa Boodhka Dabayshu ku Kiciso Gomadaha Dadka. An-Naml (91-93).

## Suurat Al-Qaṣaṣ سُورَةُ القَصَصِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Wuxuu ku Tusin Mucjisada Quraanka.

طسٓمٓ ١

2. Taasina waa Aayaadka Kitaabka (Quraanka) ee Cad.

تِلۡكَ ءَايَٰتُ ٱلۡكِتَٰبِ ٱلۡمُبِينِ ٢

3. Waxaannu kugu Akhrin Korkaaga Warkii (Nabi) Muuse iyo Fircoon si Xaq ah Qoomkii Rumayn.

نَتۡلُواْ عَلَيۡكَ مِن نَّبَإِ مُوسَىٰ وَفِرۡعَوۡنَ
بِٱلۡحَقِّ لِقَوۡمٖ يُؤۡمِنُونَ ٣

4. Fircoon wuu Isku Kibriyey Dhulka (Masar) wuxuuna ka Yeelay Ehelkiisii Kooxo, Isagoo Yaraysan (Dullayn) Koox ka Mid ah Gawricina Wiilashooda oo Dayn Haweenkooda wuxuuna ka mid ahaa kuwa wax Fasaadiya.

إِنَّ فِرْعَوْنَ عَلَا فِي ٱلْأَرْضِ وَجَعَلَ أَهْلَهَا شِيَعًا
يَسْتَضْعِفُ طَآئِفَةً مِّنْهُمْ يُذَبِّحُ أَبْنَآءَهُمْ
وَيَسْتَحْيِۦ نِسَآءَهُمْ ۚ إِنَّهُۥ كَانَ مِنَ ٱلْمُفْسِدِينَ ٤

5. Waxaanu u Dooni inaan ku Mannaysanno (Waxsiinno)kuwii lagu Dullaysanayay Dhulka kana yeello Imaamyo, kana Yeello kuwa Dhaxli Dhulka.

وَنُرِيدُ أَن نَّمُنَّ عَلَى ٱلَّذِينَ ٱسْتُضْعِفُوا۟
فِى ٱلْأَرْضِ وَنَجْعَلَهُمْ أَئِمَّةً
وَنَجْعَلَهُمُ ٱلْوَٰرِثِينَ ٥

6. Oon Makansiinno Dhulka, Tusinana Fircoon iyo Haamaan iyo Januuddooda waxay ka Digtoonaayeen (Halaagooda).

وَنُمَكِّنَ لَهُمْ فِى ٱلْأَرْضِ وَنُرِىَ فِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَ
وَجُنُودَهُمَا مِنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَحْذَرُونَ ٦

Suuraddan waxay si Gooni ah uga Warrantay wixii Dhexmaray Nabi Muuse iyo Daalimkii Fircoon ahaa, ee Isku Kibriyey kalana Qaybiyey Dadkii, Wiilashana Laayey Gabdhahana Shaqo u Reebtay, hase yeeshee wuxuu Eebe Qaddaray in kuwii la Dullaysan jiray oo Xaqa Rumeeyey ay Dhulka u Hadhaan, Madaxna Noqdaan, Fircoon iyo Gacanyarihiisii u Dhaga Nuglaa ee Haamaan iyo Colkiisiina la Tusiyo waxay ka Cabsanayeen oo ah in Xukunka laga Qaado. Qudrada Eebe iyo Awooddiisa iyo wuxuu Xukumana wax Qiyaasi ama Ogaan ma Jiro. Al-Qaṣaṣ (1-6).

---

7. Waxaan u Waxyoonay ku (Ilhaamaynay) Muuse Hooyadiis Nuuji, markaad u Cabsatana ku Tuur Hirka (Badda) hana Cabsan hana Murugoon anagaa kugu soo Celine kana Yeeli kuwa la Diro (Rasuul).

وَأَوْحَيْنَآ إِلَىٰٓ أُمِّ مُوسَىٰٓ أَنْ أَرْضِعِيهِ ۖ فَإِذَا خِفْتِ
عَلَيْهِ فَأَلْقِيهِ فِى ٱلْيَمِّ وَلَا تَخَافِى وَلَا تَحْزَنِىٓ ۖ
إِنَّا رَآدُّوهُ إِلَيْكِ وَجَاعِلُوهُ مِنَ ٱلْمُرْسَلِينَ ٧

8. Waxaana Qaatay Fircoon Dadkiisii Isagoo u Noqon doona Col iyoWalbahaar, Fircoon iyo Haamaan iyo Colkoodiina waxay Ahaayeen kuwo Gefay.

فَٱلْتَقَطَهُۥٓ ءَالُ فِرْعَوْنَ لِيَكُونَ لَهُمْ عَدُوًّا
وَحَزَنًا ۗ إِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَٰمَٰنَ وَجُنُودَهُمَا
كَانُوا۟ خَٰطِـِٔينَ ٨

9. Waxayna Tidhi Haweenaydii Fircoon waa Raaxada Ishayda iyo taada ee ha Dilina, waxay u Dhawdahay inuu ina Anfaco ama aan ka yeelanno Wiile, mana Oga Iyagu (Dhabta).

وَقَالَتِ ٱمْرَأَتُ فِرْعَوْنَ قُرَّتُ عَيْنٍ لِّى وَلَكَ ۖ
لَا تَقْتُلُوهُ عَسَىٰٓ أَن يَنفَعَنَآ أَوْ نَتَّخِذَهُۥ وَلَدًا
وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ٩

Waa la Dhalay Nabi Muuse, Hooyadiina way u Cabsatay, waxaana Eebe ku Ilhaameeyey inay Badda ku Tuurto isagoo Weel ku Jira, wuxuuna Ilaahay ku Tuuray Qalbigeeda inayan Cabsanin, Murginna, Maxaa yeelay wuu ku soo Celin, kana Yeeli Rasuul, waxaase Helay Fircoon Colkiisii Isagoo ku Noqon doona Naxdin iyo Col, Haweenaydii Fircoon markay Aragtay yey ku Tidhi Fircoon ha dilina waa Nuurka iyo Raxada Indhaheennee waxayna u Dhawdahay inuu ina Anfaco ama aan Wiil ka Dhigannee, mana oga wuxuu Xaalku ku Dambayn. Waxaa la Sheegay in Fircoon Yidhi: Aduu kuu yahay Raaxada Indhaha Anise iima aha, waxayna Noqotay Sidii. Al-Qaṣaṣ (7-9).

10. Wuxuu Ahaaday Qalbigii Muuse Hooyadiis mid Madhan waxayna u Dhawaatay inay Muujiso Haddaanaan Adkaynin Qalbigeeda inay ahaato Mu‘miniinta.

وَأَصۡبَحَ فُؤَادُ أُمِّ مُوسَىٰ فَٰرِغًاۖ إِن كَادَتۡ
لَتُبۡدِي بِهِۦ لَوۡلَآ أَن رَّبَطۡنَا عَلَىٰ قَلۡبِهَا
لِتَكُونَ مِنَ ٱلۡمُؤۡمِنِينَ ١٠

11. Waxayna ku Tidhi Walaashiis Raac, waxayna ka eegaysay Dhinac Fog, iyagoon ogayn.

وَقَالَتۡ لِأُخۡتِهِۦ قُصِّيهِۖ فَبَصُرَتۡ بِهِۦ عَن جُنُبٖ
وَهُمۡ لَا يَشۡعُرُونَ ١١

12. Waxaana ka Reebnay Korkiisa Nuugmada Horay, waxayna Tidhi Gabadhii Maydin Tusiyaa Qoys idiin Dhaqaalayn una Samo Fali.

۞وَحَرَّمۡنَا عَلَيۡهِ ٱلۡمَرَاضِعَ مِن قَبۡلُ فَقَالَتۡ
هَلۡ أَدُلُّكُمۡ عَلَىٰٓ أَهۡلِ بَيۡتٖ يَكۡفُلُونَهُۥ لَكُمۡ
وَهُمۡ لَهُۥ نَٰصِحُونَ ١٢

13. Waxaana ku soo Celinay Hooyadiis, si ay u Raaxaysato Isheedu una Murgin, Ogaatana in Yabooha Eebe Yahay Xaq Laakiin Dadka Badankiisu ma Oga.

فَرَدَدۡنَٰهُ إِلَىٰٓ أُمِّهِۦ كَيۡ تَقَرَّ عَيۡنُهَا وَلَا تَحۡزَنَ
وَلِتَعۡلَمَ أَنَّ وَعۡدَ ٱللَّهِ حَقّٞ
وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَهُمۡ لَا يَعۡلَمُونَ ١٣

Way Walbahaartay Nabi Muuse Hooyadiis markii la Helay Wiilkeedii, waxayna u Dhawaatay inay Sheegto ee Eebaa Adkeeyey Qalbigeeda, kana Yeelay Mu‘minad, waxayna Fartay Gabadh Walaashiis ah inay Dabo socoto kana Fiiriso meel Durugsan si ay ula Socoto Xaalka iyagoon Ogayn, wuuse Diiday Nuugmadii Haween kale Illeen Ilaahbaa horay u Qaddaraye, waxayna U sheegtay Gabadhii inay Hayso Qoys Dhaqaalayn, saasna Eebe ugu soo Celiyey Nabi Muuse Hooyadiis in Isheedu Qabowdo, oyna Nixin, Ogaatana in Yabooha Eebe Xaq Yahay, Dadka Badankiise Ogayn.
Waxaa Xadiith ah: Ruuxii Shaqayn oo Khayr ula Jeeda Shaqada wuxuu la mid yahay Nabi Muuse Hooyadiis Wiilkeediina way Nuujisay ujuurana way ka Qaadatay. Al-Qaṣaṣ (10-13).

---

14. Markuu Gaadhay (Nabi) muuse Xooggiisa oo Ekaaday Yaan siinay Xigmo iyo Cilmi, Saasaana ku abal Marinaa Sama Falayaasha.

وَلَمَّا بَلَغَ أَشُدَّهُۥ وَٱسۡتَوَىٰٓ ءَاتَيۡنَٰهُ حُكۡمٗا وَعِلۡمٗاۚ
وَكَذَٰلِكَ نَجۡزِي ٱلۡمُحۡسِنِينَ ١٤

15. Wuxuuna Galay Magaaladii Waqti aan Dadkeedu ogayn, wuxuuna Helay Labo Nin oo Dagaallami, oo Kaasi Yahay Qaraabadiisa kaasna Yahay Colkiisa, waxaana u Kaalmo warsaday kii Qaraabadiisa ahaa Colkiisa (Korkiisa) wuuna Feedhay Muuse wuuna Dilay, wuxuuna Yidhi waa Camal Shaydaan, Isaguna waa Col Baadiyeeya oo Cad.

وَدَخَلَ ٱلۡمَدِينَةَ عَلَىٰ حِينِ غَفۡلَةٖ مِّنۡ أَهۡلِهَا فَوَجَدَ فِيهَا
رَجُلَيۡنِ يَقۡتَتِلَانِ هَٰذَا مِن شِيعَتِهِۦ وَهَٰذَا مِنۡ عَدُوِّهِۦۖ
فَٱسۡتَغَٰثَهُ ٱلَّذِي مِن شِيعَتِهِۦ عَلَى ٱلَّذِي مِنۡ عَدُوِّهِۦ
فَوَكَزَهُۥ مُوسَىٰ فَقَضَىٰ عَلَيۡهِۖ قَالَ هَٰذَا
مِنۡ عَمَلِ ٱلشَّيۡطَٰنِۖ إِنَّهُۥ عَدُوّٞ مُّضِلّٞ مُّبِينٞ ١٥

16. Wuxuu Yidhi Eebow Anigu waxaan Dulmiyey Naftayda ee ii Dambi Dhaaf wuuna u Dambi Dhaafay Illeen Ilaahay waa Dambi Dhaafe Naxariistee.

قَالَ رَبِّ إِنِّي ظَلَمْتُ نَفْسِي فَٱغْفِرْ لِي فَغَفَرَ لَهُۥٓ
إِنَّهُۥ هُوَ ٱلْغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ﴿١٦﴾

17. Wuxuuna Yidhi Eebow Nicmadaad ii Nicmaysay Darteed Yaanan Noqonin mid u Kaalmeeya Dambiilayaasha.

قَالَ رَبِّ بِمَآ أَنْعَمْتَ عَلَيَّ فَلَنْ أَكُونَ
ظَهِيرًا لِّلْمُجْرِمِينَ ﴿١٧﴾

Wuu Waynaaday Nabi Muuse Markaasuu Eebe u Waxyooday Illeen wuxuu ahaa Sama Falee, markuu Galay Magaaladii Manaf Iyadooy Tahay Waqti aan la Ogayn, yuu Arkay Labo Nin oo Midna yahay Qoomkiisii midna Colkiisii oo Dagaalami, markuu ka Hiil doonayna wuxuu Feedhay kii Colka ahaa wuuna Dilay, Hase yeeshee wuu Qoomameeyey oo Shallaayey Illeen lama Farine,wuuna Toobakeenay, Eebana waa ka Aqbalay Illeen waa Toobad Aqbalee. Al-Qaṣaṣ (14-17).

---

18. Wuxuu ku Waabariistay Magaaladii Isagoo Cabsan oo Sugi (Dhib) Markasuu ku soo Baxay kii Gargaarka Warsaday Shalay oo Qaylyi, wuxuuna ku yidhi Muuse Adugu waxaad tahay baadi cad.

فَأَصْبَحَ فِي ٱلْمَدِينَةِ خَآئِفًا يَتَرَقَّبُ فَإِذَا ٱلَّذِي
ٱسْتَنصَرَهُۥ بِٱلْأَمْسِ يَسْتَصْرِخُهُۥ قَالَ
لَهُۥ مُوسَىٰٓ إِنَّكَ لَغَوِيٌّ مُّبِينٌ ﴿١٨﴾

19. Markuu Doonay inuu Qabto (Wax yeelo) kii Colka u ahaana wuxuu yidhi (kii loo gargaarayey) Muusow ma waxaad dooni inaad I disho Sidaad u Dishay Naf (Kale) Shalay, ma Doonaysid waxaan Jabbaar (Kibir badane) ahayn Dhulka ku Noqoto, mana Doonaysid inaad Noqoto kuwa wax Wanaajiya.

فَلَمَّآ أَنْ أَرَادَ أَن يَبْطِشَ بِٱلَّذِي هُوَ عَدُوٌّ لَّهُمَا قَالَ
يَٰمُوسَىٰٓ أَتُرِيدُ أَن تَقْتُلَنِي كَمَا قَتَلْتَ نَفْسًۢا بِٱلْأَمْسِ
إِن تُرِيدُ إِلَّآ أَن تَكُونَ جَبَّارًا فِي ٱلْأَرْضِ وَمَا تُرِيدُ
أَن تَكُونَ مِنَ ٱلْمُصْلِحِينَ ﴿١٩﴾

20. Waxaana ka Yimid Magaalada Xageeda Fog Nin Ordi oo leh Muusow, Qoomku waxay ku Tashanayaan inay ku Dilaan ee Bax Anuguna waan kuu Naseexayne.

وَجَآءَ رَجُلٌ مِّنْ أَقْصَا ٱلْمَدِينَةِ يَسْعَىٰ قَالَ يَٰمُوسَىٰٓ
إِنَّ ٱلْمَلَأَ يَأْتَمِرُونَ بِكَ لِيَقْتُلُوكَ فَٱخْرُجْ
إِنِّي لَكَ مِنَ ٱلنَّٰصِحِينَ ﴿٢٠﴾

Aayaduhu waxay InoogaWarrami in Nabi Muuse markuu dilay Ninkay Colka ahaayeen uu ahaaday mid Cabsan oo wax Yeello ka Yaabi, wuxuuna Haddana Mar Labaad la Kulmay kuu Shalay u Hiiliyey oo Haddana mid kale la Diriri, markuu ku Sheegay Doqonimo oo doonay inuu Qabto kay Colka ahaayeenna, wuxuu Faafiyey in Nabi Muuse Shalay Nin Dilay Maantana dooni inuu wax Dilo, Dhulkana Xumaan ku Faafiyo, Qoomkiina waxay ku tashadeen in la Dilo Nabi Muuse, waxaase u soo Digay Nin Naasix u ah. Al-Qaṣaṣ (18-20).

21. Wuuna ka Baxay (Magaaladii) Isagoo Cabsan oo Filan (waxyeello) wuxuuna yidhi Eebow iga Kori Qoomka Daalimiinta ah.

فَخَرَجَ مِنْهَا خَآئِفًا يَتَرَقَّبُ قَالَ رَبِّ نَجِّنِي
مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢١﴾

22. Markuu U jahaystay madyan Xaggeedana wuxuu yidhi wuxuu u Dhawyahay Eebahay inuu igu (Hanuuniyo) jidka Toosan.

وَلَمَّا تَوَجَّهَ تِلْقَآءَ مَدْيَنَ قَالَ عَسَىٰ رَبِّيٓ
أَن يَهْدِيَنِي سَوَآءَ ٱلسَّبِيلِ ﴿٢٢﴾

23. Markuu Gaadhay Biyaha Madyanna wuxuu ka Helay Ummad Dad ahoo Waraabinaysa wuxuuna ka helay Sokodooda Labo Haweena oo Reebi (Adhigooda) wuxuuna yidhi muxuu Xaalkiinu yahay, waxayna Dheheen Ma Waraabinno intay ka Fulaan Xoola jirku,Aabbahanana waa Oday Wayn.

وَلَمَّا وَرَدَ مَآءَ مَدْيَنَ وَجَدَ عَلَيْهِ أُمَّةً
مِّنَ ٱلنَّاسِ يَسْقُونَ وَوَجَدَ مِن دُونِهِمُ
ٱمْرَأَتَيْنِ تَذُودَانِ قَالَ مَا خَطْبُكُمَا قَالَتَا لَا نَسْقِي
حَتَّىٰ يُصْدِرَ ٱلرِّعَآءُ وَأَبُونَا شَيْخٌ كَبِيرٌ ﴿٢٣﴾

24. Markaasuu u Waraabiyey wuxuuna u Jeedsaday Xagga Hooska wuxuuna Yidhi Eebow waxaad ii soo Dejiso (Isiiso) oo Khayra waan u Baahnahay.

فَسَقَىٰ لَهُمَا ثُمَّ تَوَلَّىٰٓ إِلَى ٱلظِّلِّ فَقَالَ
رَبِّ إِنِّي لِمَآ أَنزَلْتَ إِلَيَّ مِنْ خَيْرٍ فَقِيرٌ ﴿٢٤﴾

markay ku Tashadeen Qoomkii inay Dilaan Nabi Muuse Yuu Baxay oo ka Tegay Masar Isagoo in la Haleelo ka Cabsan, oo Eebe Baryi inuu ka Koriyo Daalimiinta, wuxuuna Aaday Xagga Madyan Isagoo Eebe ka baryi ku Toosin Jidka Toosan, Markuu Gaadhay Biyahii Madyanna wuxuu la kulmay Dad Cabbi iyo Gabdho Celin Xoolahooda, markuu Warsadayna oy u Sheegeen in Aabbahood Yahay Oday Wayn, oyna Cabbin inta Dadku ka Cabbo, wuuse u Waraabiyey oo Hoos Fadhiistay isagoo Eebe Baryi, waana kaas Imtixaanku, waxayna la mid tahay Hijradii Nabiga Nabadgalyo korkooda Eebe ha yeelee Madiino ku aaday, waxayna ku Tusin Adkaysiga iyo ku Sugnaanta Xaqa iyo Eebe ku Xidhnaanta, iyo in Ilaahay u Gargaari Ciddii Xaqa u Gargaarta kuna Adkaata, Xaq oon muuqan oon Dadku ku Dhaqmaynna ma aha wax Habboon. Al-Qaṣaṣ (21-24).

---

25. Markaasay u Timid Gabdhihii Middood Iyadoo Xishoon waxayna ku Tidhi Aabahay wuu kuu Yeedhi inuu kaa Abaal Mariyo Ujuuradii Waraabintaada Annaga, markuu u Yimid oos Uga Warramay Qisadii yuu ku yidhi ha Cabsan Waad ka Kortay Qoomkii Daalimiinta ahaa.

فَجَآءَتْهُ إِحْدَىٰهُمَا تَمْشِي عَلَى ٱسْتِحْيَآءٍ قَالَتْ
إِنَّ أَبِي يَدْعُوكَ لِيَجْزِيَكَ أَجْرَ مَا سَقَيْتَ
لَنَا فَلَمَّا جَآءَهُ وَقَصَّ عَلَيْهِ ٱلْقَصَصَ قَالَ
لَا تَخَفْ نَجَوْتَ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٢٥﴾

26. Waxayna Tidhi Middood Aabbow noo Ijaar, Illeen waxaa u Khayr roon Cid la Ijaarto Mid Xoog Badan oo Aamin ah.

قَالَتْ إِحْدَىٰهُمَا يَٰٓأَبَتِ ٱسْتَـْٔجِرْهُ إِنَّ خَيْرَ
مَنِ ٱسْتَـْٔجَرْتَ ٱلْقَوِيُّ ٱلْأَمِينُ ﴿٢٦﴾

27. Wuxuuna ku Yidhi Anugu waxaan dooni inaan kuu Guuriyo Labadaydan Gabdhood Middood inaan ku Ijaarto Siddeed Sano Haddaad Dhammayso Tobankana waa Adiga Agtaada, mana Doonayo inaan ku Dhibo waxaana igu Ogaan Hadduu Eebe Doono kuwa Wanaagsan.

قَالَ إِنِّيٓ أُرِيدُ أَنۡ أُنكِحَكَ إِحۡدَى ٱبۡنَتَيَّ هَٰتَيۡنِ
عَلَىٰٓ أَن تَأۡجُرَنِي ثَمَٰنِيَ حِجَجٖۖ فَإِنۡ أَتۡمَمۡتَ
عَشۡرٗا فَمِنۡ عِندِكَۖ وَمَآ أُرِيدُ أَنۡ أَشُقَّ
عَلَيۡكَۚ سَتَجِدُنِيٓ إِن شَآءَ ٱللَّهُ
مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ٢٧

28. Wuxuuna Yidhi Kaasi waa Ballan Dhexdeenna ah, Labada muddo Kaan Dhammaystana dhib iguma aha, Eebana waxaan Sheegayno waa u Wakiil.

قَالَ ذَٰلِكَ بَيۡنِي وَبَيۡنَكَۖ أَيَّمَا ٱلۡأَجَلَيۡنِ
قَضَيۡتُ فَلَا عُدۡوَٰنَ عَلَيَّۖ وَٱللَّهُ عَلَىٰ مَا نَقُولُ
وَكِيلٞ ٢٨

Markay Gabdhihii u Warrameen Aabbahood yuu Middood u soo Diray, waxayna ugu Timid Iyadoo Xishoon oon Hadalka Badinayn Isqaawinayna Bixid iyo Galid badanna ahayn siduu Sayid Cumar Yidhi, waxayna u Sheegtay inuu Aabbaheed u Yeedhi si uu Uga Abaal mariyo Waraabintiisii, markuu u Yimidna oos uga Warramay Xaalkiisa wuu Xasiliyey oo u Sheegay inuuSan ka Cabsan Daalimiinta kana Nabad galay, Markay Gabdhaha middoodu Ishaartay inuu u Ijaaro Iyadoo ku Sheegi Xoog iyo Aaminnimo yuu u Guuriyey Middood kugulana ballamay inuu Siddeed Sano ama Toban Hadduu Doono U Ijaarraado,Saasayna ku Heshiiyeen,waxayna Tusin Wanaagga Taakulaynta Dadka Tabarta yar iyo Eebe ku Xidhnaanta, Tan kale Xishood iyo Sharafta Wanaaggiisa, iyo inuu Xoogga iyo Aaminaadda lagu Doorto Cidda Shaqayn, Uguurinta Ninka Wanaagsan ee Sharafta iyo Diinta leh, iyo Shaqada Xalaasha ah inay Sharaftahay, Si kasta ha u Adkaatee.
Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Nabi Muuse wuxuu u Ijaaray Naftiisa Isdhawrid iyo Calooshiisa. Al-Qaṣaṣ (25-28).

---

29. Markuu Dhammeeyey (Nabi) Muuse Muddadii oo la Tegay Ehelkiisii wuxuu ku Arkay Dhinaca Dhuur Dab, wuxuuna ku Yidhi Ehelkiisii Suga waxaan Arkaa Dabe waxaan u Dhawahay inaan Idiinka Keeno War ama Dhuxul Daba inaad Kulaashaan.

۞ فَلَمَّا قَضَىٰ مُوسَى ٱلۡأَجَلَ وَسَارَ بِأَهۡلِهِۦٓ ءَانَسَ
مِن جَانِبِ ٱلطُّورِ نَارٗاۖ قَالَ لِأَهۡلِهِ ٱمۡكُثُوٓاْ
إِنِّيٓ ءَانَسۡتُ نَارٗا لَّعَلِّيٓ ءَاتِيكُم مِّنۡهَا بِخَبَرٍ
أَوۡ جَذۡوَةٖ مِّنَ ٱلنَّارِ لَعَلَّكُمۡ تَصۡطَلُونَ ٢٩

30. Markuu Yimidna waxaaa Looga Dhawaaqay Togga Dhiniciisa Midig, Meejii Barakaysnayd oo Geedka (Isagoo la Yidhi) Anugu Ilaahay Baan ahay Eebaha Caalamka ah.

فَلَمَّآ أَتَىٰهَا نُودِيَ مِن شَٰطِيِٕ ٱلۡوَادِ ٱلۡأَيۡمَنِ
فِي ٱلۡبُقۡعَةِ ٱلۡمُبَٰرَكَةِ مِنَ ٱلشَّجَرَةِ أَن يَٰمُوسَىٰٓ
إِنِّيٓ أَنَا ٱللَّهُ رَبُّ ٱلۡعَٰلَمِينَ ٣٠

31. Ee Tuur Ushaada Markuu Arkay iyadoo Gilgilanna ood Mooddo Mas wuu Jeedsaday Isagoo Carari, mana soo Jeedsan, (waxaana lagu Yidhi) Muusow soo Qaabil (soo Noqo), hana

وَأَنۡ أَلۡقِ عَصَاكَۖ فَلَمَّا رَءَاهَا تَهۡتَزُّ كَأَنَّهَا
جَآنّٞ وَلَّىٰ مُدۡبِرٗا وَلَمۡ يُعَقِّبۡۚ يَٰمُوسَىٰٓ أَقۡبِلۡ

وَلَا تَخَفْ إِنَّكَ مِنَ ٱلْءَامِنِينَ ﴿٣١﴾

Cabsan Adugu Aaminbaad tahay (waad nabadgali).

ٱسْلُكْ يَدَكَ فِى جَيْبِكَ تَخْرُجْ بَيْضَآءَ مِنْ غَيْرِ سُوٓءٍ
وَٱضْمُمْ إِلَيْكَ جَنَاحَكَ مِنَ ٱلرَّهْبِ فَذَٰنِكَ
بُرْهَٰنَانِ مِن رَّبِّكَ إِلَىٰ فِرْعَوْنَ وَمَلَإِي۟هِۦٓ
إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمًا فَٰسِقِينَ ﴿٣٢﴾

32. Gali Gacantaada Jeebkaaga waxay so Bixi Iyadoo Cad Xumaan (cudur) La‘aan, Iskuna Dhaji Garabkaaga Argagaxa Dartiis taasina waa Xujooyin Eebe ka ahaatay oo Fircoon iyo Qoomkiisa (Loo diray) waana Qoom Faasiqiina.

Wuu Dhammaystay Nabi Muuse Muddadii wuxuuna la Tagay Ehelkii, wuxuuna Arkay Iftiin markuu Tagayna waa loo waxyooday, waxaana Muuqatay Calaamaddii Usha iyo Gacanta, Cabsidiina waxay ku Rogmatay Fircoon iyo Colkiisii, Ileen Faasiqiin bay ahaayeene, saasayna Qisadu ku Socotaa inta laga Halaagi Fircoon iyo Colkiisa. Al-Qaṣaṣ (29-32).

---

قَالَ رَبِّ إِنِّى قَتَلْتُ مِنْهُمْ نَفْسًا فَأَخَافُ
أَن يَقْتُلُونِ ﴿٣٣﴾

33. Wuxuu Yidhi Eebow waxaan ka Dilay Naf waxaana ka Cabsan inay I dilaan.

وَأَخِى هَٰرُونُ هُوَ أَفْصَحُ مِنِّى لِسَانًا فَأَرْسِلْهُ
مَعِىَ رِدْءًا يُصَدِّقُنِىٓ إِنِّىٓ أَخَافُ أَن يُكَذِّبُونِ ﴿٣٤﴾

34. Walaalkay Haaruunbaana iga Fasiixsan Carrabka (Hadalka), ee Ila Dir Xoojin ha ii Rumeeyee, waxaan ka Cabsan inay I beeniyaan.

قَالَ سَنَشُدُّ عَضُدَكَ بِأَخِيكَ وَنَجْعَلُ لَكُمَا
سُلْطَٰنًا فَلَا يَصِلُونَ إِلَيْكُمَا بِـَٔايَٰتِنَآ
أَنتُمَا وَمَنِ ٱتَّبَعَكُمَا ٱلْغَٰلِبُونَ ﴿٣٥﴾

35. Wuxuu yidhi (Eebe) waannu ku Xoojin Cududdaada Walaalkaa waxaana idiin yeeli Xujo Idimana Gaadhayaan (Dhibkiinna) aayaadkanaga Dartood, Idinka iyo Inta idin Raacday yaana Adkaan.

فَلَمَّا جَآءَهُم مُّوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَا بَيِّنَٰتٍ قَالُوا۟
مَا هَٰذَآ إِلَّا سِحْرٌ مُّفْتَرًى وَمَا سَمِعْنَا بِهَٰذَا
فِىٓ ءَابَآئِنَا ٱلْأَوَّلِينَ ﴿٣٦﴾

36. Markuu Ula Yimid muuse Aayaadkanaga oo Cad Cad waxay Dheheen kani waa Sixir la Abuurtay mana Aanaan ku maqal kan (oo kale) Aabbayaalkannagii horreeyey.

وَقَالَ مُوسَىٰ رَبِّىٓ أَعْلَمُ بِمَن جَآءَ بِٱلْهُدَىٰ
مِنْ عِندِهِۦ وَمَن تَكُونُ لَهُۥ عَٰقِبَةُ ٱلدَّارِ
إِنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿٣٧﴾

37. Wuxuuna yidhi Nabi Muuse Eebahaybaa og Cidda kala Timid Hanuun Agtiisa iyo Cidday u ahaan Cidhibta dambe Illeen ma Liibaano daalime.

Nabi Muuse wuxuu u Cawday Eebe isagoo Sheegi inuu naf ka Dilay, kana Yaabi inay Dilaan, Haaruunna ka Fasiixsanyahay oos Eebe ka Dalbi inuu ku Xoojiyo oo la Diro, Eebaa Ajiibay oo lala Diray Xujona Yeelay, uguna Bishaareeyey inay Dhibayn, oyna iyagu Adkaan, Gaalo Waa Caadadeede way Beeniyeen Xaqii waxayna ku Sheegeen Sixir, Eebaase og Cidda Hanuun la Timid iyo Tan Guulaysan, Gaalase ma Liibaanto, waxay Dheheen Dadkii hore Qaarkood,Cid Walaal uga wax tar badan Nabi Muuse ma jirto Eebuu Baryey inuu Haaruun Nabi laga Yeelo waana ka Aqbalay. Al-Qaṣaṣ (33-37).

38. Wuxuu Yidhi Fircoon Madaxeey Idiinma Ogi Eebe Iga soo Hadhay ee ii Huri Haamaanow Dhoobada iina Yeel Daar (dheer) inaan Daalacdo Ilaaha Muuse waxaan u Malayn inuu Beenaale yahaye.

وَقَالَ فِرْعَوْنُ يَٰٓأَيُّهَا ٱلْمَلَأُ مَا عَلِمْتُ لَكُم
مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرِى فَأَوْقِدْ لِى يَٰهَٰمَٰنُ عَلَى ٱلطِّينِ
فَٱجْعَل لِّى صَرْحًا لَّعَلِّىٓ أَطَّلِعُ إِلَىٰٓ إِلَٰهِ
مُوسَىٰ وَإِنِّى لَأَظُنُّهُۥ مِنَ ٱلْكَٰذِبِينَ ٣٨

39. Waxay Isku Kibriyeen isaga iyo Colkiisiiba Dhulka Xaq Darro waxayna u Maleeyeen inaan Xagganaga loo soo Celinayn.

وَٱسْتَكْبَرَ هُوَ وَجُنُودُهُۥ فِى ٱلْأَرْضِ بِغَيْرِ ٱلْحَقِّ
وَظَنُّوٓا۟ أَنَّهُمْ إِلَيْنَا لَا يُرْجَعُونَ ٣٩

40. Waana Qabanay Isaga iyo Colkiisii waxaana ku Tuuray Badda ee Day Siday Noqotay Cidhibtii Daalimiinta.

فَأَخَذْنَٰهُ وَجُنُودَهُۥ فَنَبَذْنَٰهُمْ فِى ٱلْيَمِّ
فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ
عَٰقِبَةُ ٱلظَّٰلِمِينَ ٤٠

41. waxaana ka Yeellay Madax ugu Yeedha Naarta, Maalinta Qiyaamana looma Gargaaro.

وَجَعَلْنَٰهُمْ أَئِمَّةً يَدْعُونَ إِلَى ٱلنَّارِ
وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ لَا يُنصَرُونَ ٤١

42. Waxaana Raacinay Adduunyadan Lacnad, Maalinta Qiyaamana waxay noqon kuwa la dheereeyey (La halaagay).

وَأَتْبَعْنَٰهُمْ فِى هَٰذِهِ ٱلدُّنْيَا لَعْنَةً
وَيَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ هُم مِّنَ ٱلْمَقْبُوحِينَ ٤٢

43. Waxaan Siinay (Nabi) Muuse Kitaabka ka Dib Intaan halaagnay Quruumihii hore, Isagoo Aragti u ah Dadka iyo Hanuun iyo Naxariis inay Xusuustaan Darteed.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَى ٱلْكِتَٰبَ مِنۢ بَعْدِ
مَآ أَهْلَكْنَا ٱلْقُرُونَ ٱلْأُولَىٰ بَصَآئِرَ لِلنَّاسِ
وَهُدًى وَرَحْمَةً لَّعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ٤٣

**Fircoon Jaahilnimadiisa iyo Isla waynidiisa wuxuu Sheegtay Ilaahnimo, isagoo Fari in loo Dhiso Guri wayn si uu ugu Khaldo inuu Eebe Daydayey soona waayey, dhabtii wuu is kibriyey, maxaase ka raacay isaga iyo Qoomkiisii, Muxuuse Ilaahnimo U Sheegan waayey markii la Maansheeyey ee uu Cabaadayey, waana la Nacladay Adduun iyo Aakhiraba lana Dulleeyay. Kitaabkii Tawreed ee Nabi Muuse la Siiyeyna wuxuu ahaa Waano, hanuun, iyo Naxariis haddii Dhabtiisii lagu Dhaqmo. Al-Qaṣaṣ (38-43).**

---

44. Maadan ahayn Dhinaca Galbeed ee Buurta markaan Siinaynay Muuse Amarka «Nabinimada» mana aadan ahayn Kuwii Joogay.

وَمَا كُنتَ بِجَانِبِ ٱلْغَرْبِىِّ إِذْ قَضَيْنَآ إِلَىٰ مُوسَى
ٱلْأَمْرَ وَمَا كُنتَ مِنَ ٱلشَّٰهِدِينَ ٤٤

45. Laakiin waxaan ahaysiinay Quruumo waxaana ku dheeraaday Cimrigii, mana aadan ahayn mid ku nagaa Ehelkii Madyan Adoo ku Akhrin Korkooda Aayaadkanaga Laakiin anagaa ku Dirray.

وَلَٰكِنَّآ أَنشَأْنَا قُرُونًا فَتَطَاوَلَ عَلَيْهِمُ ٱلْعُمُرُ
وَمَا كُنتَ ثَاوِيًا فِىٓ أَهْلِ مَدْيَنَ تَتْلُوا۟
عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِنَا وَلَٰكِنَّا كُنَّا مُرْسِلِينَ ٤٥

46. Mana aadan ahayn Dhinicii (Buurta) Dhuur markaan u Dhawaaqnay Laakiin waa naxariista Eebahaa Inaad u Digto qoom uusan u Imaan Dige kaa Horreeyey inayWaantoobaan.

وَمَا كُنتَ بِجَانِبِ ٱلطُّورِ إِذْ نَادَيْنَا وَلَٰكِن رَّحْمَةً
مِّن رَّبِّكَ لِتُنذِرَ قَوْمًا مَّآ أَتَىٰهُم مِّن نَّذِيرٍ
مِّن قَبْلِكَ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ٤٦

47. Hadday markay ku Dhacdo Musiibo (Dhib) waxay hormarsadeen Gacmahoodu Darteed oo Markaas ay Dhahaan Eebow Maxaad noogu soo Diri wayday Rasuul oo Raacno Aayaadkaaga Noqonnana Mu‘miniinta « waa la Ciqaabi lahaa ».

وَلَوْلَآ أَن تُصِيبَهُم مُّصِيبَةٌۢ بِمَا قَدَّمَتْ أَيْدِيهِمْ
فَيَقُولُوا۟ رَبَّنَا لَوْلَآ أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا فَنَتَّبِعَ
ءَايَٰتِكَ وَنَكُونَ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٤٧

Aayado Badan Yuu Eebe ku Caddeeyey inuusan Nabigu Joogin markay wax ka Dhaceen Ummadihii hore, sida warkii Maryan, Halaaggii Qoomkii Nabi Nuux, Nabi Yuusuf iyo Walaalihii iyo Nabi Muuse iyo Fircoon iyo Wixii la mid ah, ee Eebe wuxuu ku Ogaysiiyey Waxyi, Nabiguna ma Joogin Dhuurkii Eebe Nabi Muuse kula Hadlay, iyo Madyan ee waxaa ka soo Wareegtay Sanooyin iyo Quruumo, waxaase Eebe siiyey Nabiga Naxariis iyo waxyi si uu ugu Digo Qoom Jaahiliin ah oo Haddii la Cadaabana ku Calaacali maxaa Rasuul na loogu soo Diri Waayey aan Raacno oon Rumeyno.
Taasina waxay Muujin Xaqnimada Quraanka iyo inuu Yahay soo Dejin Eebaha wax walba og. Al-Qaṣaṣ (44-47).

---

48. Markuu uga yimid Xaqii Xagganaga yey Dheheen maa la Siiyo wixii la Siiyey (Nabi) Muuse oo kale, miyeyna ka Gaaloobin wixii la Siiyey Muuse Horay, oyna Dhihin waa Labo Sixir oo Iskaalmaystay waxayna dheheen Annagu Dhammaan waan ka Gaalownay.

فَلَمَّا جَآءَهُمُ ٱلْحَقُّ مِنْ عِندِنَا قَالُوا۟ لَوْلَآ أُوتِىَ
مِثْلَ مَآ أُوتِىَ مُوسَىٰٓ ۚ أَوَلَمْ يَكْفُرُوا۟ بِمَآ أُوتِىَ
مُوسَىٰ مِن قَبْلُ ۖ قَالُوا۟ سِحْرَانِ تَظَٰهَرَا
وَقَالُوٓا۟ إِنَّا بِكُلٍّ كَٰفِرُونَ ٤٨

49. Waxaad Dhahdaa ka Keena Kitaab Xagga Eebe ka Hanuun badan Labadooda aan raacnee haddaad Run Sheegaysaan.

قُلْ فَأْتُوا۟ بِكِتَٰبٍ مِّنْ عِندِ ٱللَّهِ هُوَ أَهْدَىٰ مِنْهُمَآ
أَتَّبِعْهُ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ٤٩

50. Haddayna ku Ajiibin (Maqlin) Ogow inay uun Raacayaan Hawadooda, wax ka Dhumid badanna ma jirto cid Raacday Hawadeeda Hanuun Eebe La‘aantiis, Eebana ma Hanuuniyo Qoom Daalimiin ah.

فَإِن لَّمْ يَسْتَجِيبُوا۟ لَكَ فَٱعْلَمْ أَنَّمَا يَتَّبِعُونَ
أَهْوَآءَهُمْ ۚ وَمَنْ أَضَلُّ مِمَّنِ ٱتَّبَعَ هَوَىٰهُ بِغَيْرِ
هُدًى مِّنَ ٱللَّهِ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى
ٱلْقَوْمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥٠

51. Dhab ahaanbaan ugu Xidhiidhinay (ugu Caddayn) Hadalka inay Waantoobaan.

وَلَقَدۡ وَصَّلۡنَا لَهُمُ ٱلۡقَوۡلَ لَعَلَّهُمۡ يَتَذَكَّرُونَ ٥١

Gaaladu War iyo Madax Adayg kama Daalaan, mar waxay ku Calaacali maa naloo soo Diro Dige, markuu Nabigu (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Xaq ula Yimidna waxay Dheheen maa wixii Nabi Muuse la Siiyey oo kale la Siiyo, Dhabtuna waa inay ka Gaaloobeen wixii Nabi Muuse la Siiyey, oy kuna Sheegeen Isaga Iyo Quraanka Sixir Iskaalmaysan, waxaase lagu Aamusiiyey laguna Xujeeyey inay Keenaan Kitaab ka Fiican hadday Run Sheegi, haddii kalese waa Daalimiin Hawadooda Raacay xaq la‘aan, wax badanna Eebe wuu u Caddeeyey Dadka Xaqa bal inay waano Qaataan.
Cigrime Wuxuu yidhi: Labo Sixir waxay ula Jeedaan Tawreed iyo Injiil. Al-Qaṣaṣ (48-51).

---

52. Kuwaannu Siinay Kitaabka Hortiis way Rumayn isaga.

ٱلَّذِينَ ءَاتَيۡنَٰهُمُ ٱلۡكِتَٰبَ مِن قَبۡلِهِۦ
هُم بِهِۦ يُؤۡمِنُونَ ٥٢

53. Marka lagu Akhriyo Korkoodana waxay Dhahaan waan Rumaynay Quraanku inuu Xaq Eebaheen ka Yimid yahay Annaguna waxaan ahayn hortiis Muslimiin.

وَإِذَا يُتۡلَىٰ عَلَيۡهِمۡ قَالُوٓاْ ءَامَنَّا بِهِۦٓ إِنَّهُ ٱلۡحَقُّ مِن رَّبِّنَآ
إِنَّا كُنَّا مِن قَبۡلِهِۦ مُسۡلِمِينَ ٥٣

54. Kuwaas waxaa la Siiyey Ajrigooda Labo mar Samirkoodii Dartiis, waxayna Raaciyaan Xumaanta Wanaag waxaan ku Arzuqnayna waxbay ka Bixiyaan.

أُوْلَٰٓئِكَ يُؤۡتَوۡنَ أَجۡرَهُم مَّرَّتَيۡنِ بِمَا صَبَرُواْ وَيَدۡرَءُونَ
بِٱلۡحَسَنَةِ ٱلسَّيِّئَةَ وَمِمَّا رَزَقۡنَٰهُمۡ يُنفِقُونَ ٥٤

55. Markay Maqlaan hadal Macno Darrana way ka Jeedsadaan waxayna Dhahaan Annagu Camalkanaga yaan leenahay idinna Camalkiinna Waad Salaamantihiin ma Rabno Jaahiliin (Waddadooda).

وَإِذَا سَمِعُواْ ٱللَّغۡوَ أَعۡرَضُواْ عَنۡهُ وَقَالُواْ لَنَآ
أَعۡمَٰلُنَا وَلَكُمۡ أَعۡمَٰلُكُمۡ سَلَٰمٌ عَلَيۡكُمۡ
لَا نَبۡتَغِي ٱلۡجَٰهِلِينَ ٥٥

56. Adugu ma Hanuunisid Ciddaad Jeceshahay laakiin Eebaa Hanuuniya Cidduu Doono Isagaana Og kuwa Hanuunsan.

إِنَّكَ لَا تَهۡدِي مَنۡ أَحۡبَبۡتَ وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَهۡدِي
مَن يَشَآءُۚ وَهُوَ أَعۡلَمُ بِٱلۡمُهۡتَدِينَ ٥٦

57. Waxay Dheheen Gaaladii (Makaad) Haddaan Raacno Hanuunka waxaa Nalaga Dafi Dhulkannaga, Miyaanaan Siinin Xaram Aamina oo la Kee-

وَقَالُوٓاْ إِن نَّتَّبِعِ ٱلۡهُدَىٰ مَعَكَ نُتَخَطَّفۡ مِنۡ أَرۡضِنَآۚ
أَوَلَمۡ نُمَكِّن لَّهُمۡ حَرَمًا ءَامِنٗا يُجۡبَىٰٓ إِلَيۡهِ

no Midhaha wax Kasta quudin Darteed oo Xagganaga ah, Laakiin Badankood ma Oga.

ثَمَرَٰتُ كُلِّ شَيْءٍ رِّزْقًا مِّن لَّدُنَّا وَلَٰكِنَّ
أَكْثَرَهُمْ لَا يَعْلَمُونَ ﴿٥٧﴾

Aayadahan waxay ku soo Degeen kuwii Rumeeyey oo Ehelu Kitaabka ahaa, inay Rumeeyeen Xaqa, Muslimna ahaayeen, Ajirkana loo laab laabi, Xumaanta iyo Warka Jaahiliintana ay ka Jeedsan jireen. Aayadaha kalana waxay ku soo Degeen Xaalkii Abuudaalib Nabiga Adeerkiis markuu Nabigu ka Quustay, in Eebe uun Hanuuniyo Cidduu Doono ee Cid kale wax Qabankarin, tan kalana waxay ka Warrami sida Eebe ugu Nicmeeyey Ree Makaad iyo Siday Xaqa u Diidi, Bukhaari iyo Muslim waxay Sheegeen in Markuu Sakaraadku Qabtay Abuudaalib Nabigu (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ku Yidhi:
Adeer Ashahaado aan Eebe Agtiisa kuugu Xujestee, Markaasuu Yidhi: Wuu Cabsaday lay Dhihi Maayo, Markaasuu Dhintay. Al-Qaṣaṣ (52-57).

---

58. Badanaa intaan Halaagnay Magaalo ku Kibirtay Nolasheeda waana Taas Guryahoodii lamana Degin Gadaashood wax yar mooyee, Anagaana ah kuwo Dhaxla (Hadha).

وَكَمْ أَهْلَكْنَا مِن قَرْيَةٍ بَطِرَتْ مَعِيشَتَهَا
فَتِلْكَ مَسَٰكِنُهُمْ لَمْ تُسْكَن مِّنۢ بَعْدِهِمْ
إِلَّا قَلِيلًا وَكُنَّا نَحْنُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴿٥٨﴾

59. Mana aha Eebahaa mid Halaaga Magaalo intuu uga Bixiyo Tan Hooyada u ah «Caasimadda» Rasuul ku Akhriya Korkooda Aayaadkanaga mana nihin kuwo Halaaga Magaalo aan Ehelkeedu Daalimiin ahayn.

وَمَا كَانَ رَبُّكَ مُهْلِكَ ٱلْقُرَىٰ حَتَّىٰ يَبْعَثَ فِىٓ أُمِّهَا
رَسُولًا يَتْلُوا۟ عَلَيْهِمْ ءَايَٰتِنَا وَمَا كُنَّا مُهْلِكِى
ٱلْقُرَىٰٓ إِلَّا وَأَهْلُهَا ظَٰلِمُونَ ﴿٥٩﴾

60. Wixii Laydin Siiyey oo Wax ah waa uun Raaxada Nolasha Dhaw iyo Quruxdeeda waxase Eebe Agtiisa ah yaa Khayr Roon oo Hadhid badan ee Miyeydaan wax Kasayn.

وَمَآ أُوتِيتُم مِّن شَيْءٍ فَمَتَٰعُ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَزِينَتُهَا
وَمَا عِندَ ٱللَّهِ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰٓ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٦٠﴾

61. Ruuxaan u Yaboohnay Yabooh Fiican oo La Kulmi ma la Midbaa Ruuxaan ugu Raaxaynay Nolosha Dhaw markaas noqon Maalinta Qiyaame kuwa la Soo Joojin (La Cadaabi).

أَفَمَن وَعَدْنَٰهُ وَعْدًا حَسَنًا فَهُوَ لَٰقِيهِ
كَمَن مَّتَّعْنَٰهُ مَتَٰعَ ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا ثُمَّ هُوَ يَوْمَ ٱلْقِيَٰمَةِ
مِنَ ٱلْمُحْضَرِينَ ﴿٦١﴾

Wax badan yuu Eebe halaagay Magaalo ku Kibirtay Nolasheeda, markaas aan la Degin Guryahoodii iyaga kadib wax yar mooyee, Eebe umbaana u Hadhay, Lamana Halaago umad inta looga Diro Rasuul magaaladooda Weyn, Sidii Maka, kuna Akhriyo Quraanka, Halaaguna wuxuu ku Dhacaa Markay Dulmi Falaan.
Wax kasta oo Addunyo wax laysku Siiyana waa uun Nolol Dhaw oo Tagi, waxaase Khary roon oo Hadhid badan Wanaagga Eebe Agtiisa ah, waana in wax la kasaa oo Lawaano Qaato. Mana sinna Ruux Wanaag loo Yaboohay oo la kulmi, iyo mid wax yar loo Raaxeeyey oo Noqon Qiyaamada kuwa loo soo Taago Ciqaabta. Ujeedaduna waa in Kibir iyo Isla waynida Macno Darro layska jiro, Raaxada Adduunna lagu Kadsoomin ee si Fiican iyo Sharaf iyo Eebe ka yaabid lagu Noolaado, Illeen Adduun iyo Aakhiro waxay isu yihiin Far Bad lagaliyey oo kalee Siduu Nabigu Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee), Al-Qaṣaṣ (58-61).

62. Xusuuso Maalinta Eebe u Yeedhi Gaalada oo ku Dhihi Aaway kuwaad ila Wadaajiseen ah kuwaad Sheega-nayseen (Caabudayseen).

وَيَوۡمَ يُنَادِيهِمۡ فَيَقُولُ أَيۡنَ شُرَكَآءِيَ ٱلَّذِينَ
كُنتُمۡ تَزۡعُمُونَ ٦٢

63. Kuwii waxay Dheheen uu ku Sug-naaday Hadalkii Eebe (Ciqaabtii) Ee-bow kuwaasu waa kuwaan Baadi-yeynay, waana Baadiyeynay sidaan u Baadiyoownay waana isagakaa Bari-yeelay mana ahayn kuwo Anaga Na caabuda.

قَالَ ٱلَّذِينَ حَقَّ عَلَيۡهِمُ ٱلۡقَوۡلُ رَبَّنَا هَٰٓؤُلَآءِ
ٱلَّذِينَ أَغۡوَيۡنَآ أَغۡوَيۡنَٰهُمۡ كَمَا غَوَيۡنَاۖ تَبَرَّأۡنَآ إِلَيۡكَۖ
مَا كَانُوٓاْ إِيَّانَا يَعۡبُدُونَ ٦٣

64. Waxaana loo Odhan Uyeedha Shurukadiinna markaasay u Yeedhaan mase Ajiibaan (Maqlaan) waxayna ar-kaan Cadaabka Markaasay Qooma-moodaan Hadday Hanuunilahaayeen.

وَقِيلَ ٱدۡعُواْ شُرَكَآءَكُمۡ فَدَعَوۡهُمۡ فَلَمۡ يَسۡتَجِيبُواْ
لَهُمۡ وَرَأَوُاْ ٱلۡعَذَابَۚ لَوۡ أَنَّهُمۡ كَانُواْ يَهۡتَدُونَ ٦٤

65. Xusuuso Maalintaan u Yeed-hayno Gaalada oos ku Odhan Eebe Maxaad ugu Jawaabteen Rasuulladii.

وَيَوۡمَ يُنَادِيهِمۡ فَيَقُولُ مَاذَآ أَجَبۡتُمُ ٱلۡمُرۡسَلِينَ ٦٥

66. Markaasay ku Indho Beeshay kor-kooda Xujadii (Waayeen Xujo) Maa-lintaas, waxna Isma Warsadaan.

فَعَمِيَتۡ عَلَيۡهِمُ ٱلۡأَنۢبَآءُ يَوۡمَئِذٖ
فَهُمۡ لَا يَتَسَآءَلُونَ ٦٦

67. Ruuxiise Toobadkeena oo Ru-meeya oo Fala Camal Fiican wuxuu u Dhawyahay inuu Noqdo kuwa Lii-baanay.

فَأَمَّا مَن تَابَ وَءَامَنَ وَعَمِلَ صَٰلِحٗا فَعَسَىٰٓ
أَن يَكُونَ مِنَ ٱلۡمُفۡلِحِينَ ٦٧

Maalinta Qiyaamana wuu soo kulmin Eebe Waydiinna waxay Caabudi Jireen, waxayna Qiran in Qaar-kood Qaar Baadiyeeyey, wayna iska Fogayn inay Caabudi jireen, markay u Yimaaddaanna Ma Maqlaan, waxayna Qoomamoodaan HanuunLa‘aantii. markii la Warsado waxay Rasuuladii Qaabileenna waxba way Sheegi waayi, waxna isma Warsadaan. Cidiise Toobadkeenta oo Wanaag Fasha wuxuu u Dhawya-hay in Loo Naxariisto.. Al-Qaṣaṣ (62-67).

---

68. Eebahaa wuxuu Abuuraa wuxuu Doono oo Doorto, Doorasho ma Leh Iyagu (Dadku) waa ka Nasahanyahay Eebe waana ka Sarreeyaa waxay la Wa-daajin.

وَرَبُّكَ يَخۡلُقُ مَا يَشَآءُ وَيَخۡتَارُۗ مَا كَانَ
لَهُمُ ٱلۡخِيَرَةُۚ سُبۡحَٰنَ ٱللَّهِ وَتَعَٰلَىٰ
عَمَّا يُشۡرِكُونَ ٦٨

69. Eebahaana waa Ogyahay waxay qarin Laabtoodu iyo waxay Muujinba.

وَرَبُّكَ يَعۡلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمۡ
وَمَا يُعۡلِنُونَ ٦٩

70. Eebana waa Ilaaha isaga mooyee aan Ilaah kale Jirin, Mahad buu mutaa Adduun iyo Aakhiraba, Xukunkana isagaa iska leh Xaggiisaana loo Noqon.

وَهُوَ ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ لَهُ ٱلْحَمْدُ فِى ٱلْأُولَىٰ
وَٱلْءَاخِرَةِ وَلَهُ ٱلْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ﴿٧٠﴾

71. Waxaad Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Eebe Korkiinna Habeen Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa Kee Eebaha ka soo Hadhay Ilaahay ee idiin keeni Nuur miyaydaan wax Maqlayn.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن جَعَلَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمُ ٱلَّيْلَ سَرْمَدًا
إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ مَنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِضِيَآءٍ
أَفَلَا تَسْمَعُونَ ﴿٧١﴾

72. Waxaadna Dhahdaa bal Warrama Hadduu ka Yeelo Eebe Korkiinna Maalin Joogta ah tan iyo Qiyaamada waa kee Eebaha ka soo Hadhay Ilaahay ee idiin keeni Habeen aad ku Xasishaan Dhexdiisa miyeydaan wax arkayn.

قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن جَعَلَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمُ ٱلنَّهَارَ
سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ مَنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ
يَأْتِيكُم بِلَيْلٍ تَسْكُنُونَ
فِيهِ أَفَلَا تُبْصِرُونَ ﴿٧٢﴾

73. Naxariistiisa waxaa ka mid ah inuu idiin yeelay Habeen iyo Dharaarba inaad Xasishaan dhexdiisa Dalabtaanna Fadligiisa iyo inaad ku Shugridaan.

وَمِن رَّحْمَتِهِۦ جَعَلَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ لِتَسْكُنُوا۟
فِيهِ وَلِتَبْتَغُوا۟ مِن فَضْلِهِۦ وَلَعَلَّكُمْ تَشْكُرُونَ ﴿٧٣﴾

Eebaa wax Abuura waxna Doorta, Dadse wax ma doortaan, Eebana Xumaan wuu ka Nasahan Yahay, Waxa la Qarin iyo waxa la Muujinna waa Ogyahay, Eebe Mooyee Ilaah ma jiro, Mahad iyo Xukunna isagaa iska leh Adduun iyo Aakhiraba. waana Eebaha Habeen iyo Maalin inoo Yeelay een midna Joogto ka Yeelin, Laakiin Naxariis Darteed yuu Habeenka iyo Dharaarta inoogu yeelay si loo Xasilo loona Shaqeeyo waxaa wax mudan Mahad Eebe, iyo Cibaadadiisa. Al-Qaṣaṣ (68-73).

---

74. Xusuuso Maalintaan u Yeedhayno Gaalada oo Eebe odhana Aaway Shurakadaydii ah kuwaad Sheeganayseen,

وَيَوْمَ يُنَادِيهِمْ فَيَقُولُ أَيْنَ شُرَكَآءِىَ
ٱلَّذِينَ كُنتُمْ تَزْعُمُونَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaana ka soo Siibnaa ummad kasta Markhaati waxaana ku nidhi keena Xujadiinna waxayna Ogaadaan in Xaqa Eebe Leeyahay waxaana ka Dhumay Xagooda waxay Been Abuuran Jireen.

وَنَزَعْنَا مِن كُلِّ أُمَّةٍ شَهِيدًا فَقُلْنَا
هَاتُوا۟ بُرْهَٰنَكُمْ فَعَلِمُوٓا۟ أَنَّ ٱلْحَقَّ لِلَّهِ
وَضَلَّ عَنْهُم مَّا كَانُوا۟ يَفْتَرُونَ ﴿٧٥﴾

76. Qaaruunna wuxuu ka mid ahaa qoomkii (Nabi) muuse, wuuna ku Kibray Korkooda, waxaana Siinay wax Furayaalkiisu ku Culustahay Koox Xoog badan, markay ku Dheheen

۞ إِنَّ قَٰرُونَ كَانَ مِن قَوْمِ مُوسَىٰ فَبَغَىٰ
عَلَيْهِمْ وَءَاتَيْنَٰهُ مِنَ ٱلْكُنُوزِ مَآ إِنَّ مَفَاتِحَهُۥ لَتَنُوٓأُ
بِٱلْعُصْبَةِ أُو۟لِى ٱلْقُوَّةِ إِذْ قَالَ لَهُۥ قَوْمُهُۥ لَا تَفْرَحْ

qoomkiisii ha Farxin (Kibrin) Eebe ma Jecla kuwa Farxa «Kibree».

إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْفَرِحِينَ ﴿٧٦﴾

77. Kuna doon waxa Eebe ku siiyey Guriga Aakhiro hana Halmaamin qaybtaada Adduunka Samana Fal sida Eebe kuugu Samo Falay hana La doonin Fasaad Dhulka, Eebe ma Jecla Fasaadiyaashee.

وَٱبْتَغِ فِيمَآ ءَاتَىٰكَ ٱللَّهُ ٱلدَّارَ ٱلْـَٔاخِرَةَ ۖ
وَلَا تَنسَ نَصِيبَكَ مِنَ ٱلدُّنْيَا ۖ وَأَحْسِن
كَمَآ أَحْسَنَ ٱللَّهُ إِلَيْكَ ۖ وَلَا تَبْغِ ٱلْفَسَادَ
فِى ٱلْأَرْضِ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ ٱلْمُفْسِدِينَ ﴿٧٧﴾

**Haddana Mar kalaa loo Dhawaaqi iyagoo la Warsan waxay Caabudi Jireen, Umad walbana waxaa laga soo Saari Marag oo Rasuul ah, waxaana la warsan inay keenaan Xujo waxayna Yaqiinsadeen in Xaqu Eebe u Sugnaaday, waxaana ka Dhumay Beentay Abuuran Jireen. qaaruunna wuxuu ka mid ahaa qoomkii Nabi Muuse wuuse ku Kibray, isagoo lahaa Xoolo Badan oo Furayaashiisu Culaysiso Koox Xoog Badan, waxayna Saaxiibadiis ugu Naseexeeyeen inuusan Kibrin oon Faraxu ku Xambaarin Isla wayni, waxa Eebe Siiyeyna uu ku Doono Aakhiro, uusan Halmaaminna Nasiibkiisa Adduunka, wanaagna falo sida Eebe ugu Wanaag falay, Xumaan iyo Fasaadna uusan Dhulka la doonin, Illeen Eebe ma Jecla Xumaan wadayaasha iyo kuwa wax Fasaadiyee.**
**Faraxana lama Diidana Hadduuna Fudayd iyo Xumaan kugu Xambaarayn ee waxaa uun la Rabaa Wanaag iyo Eebe ku Xidhnaan. Al-Qaṣaṣ (74-77).**

---

78. Wuxuuna Yidhi waxaa uun La ii siiyey Xoolaha Ogaanshahayga, Miyuusan ogayn in Eebe Halaagay Hortiis Quruumihii kuwo ka daran Xaggiisa Xoogga kana Badan Kulan, lamana Warsado Dambigooda Dambiilayaasha.

قَالَ إِنَّمَآ أُوتِيتُهُۥ عَلَىٰ عِلْمٍ عِندِىٓ ۚ أَوَلَمْ يَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ
قَدْ أَهْلَكَ مِن قَبْلِهِۦ مِنَ ٱلْقُرُونِ مَنْ هُوَ أَشَدُّ مِنْهُ
قُوَّةً وَأَكْثَرُ جَمْعًا ۚ وَلَا يُسْـَٔلُ عَن ذُنُوبِهِمُ
ٱلْمُجْرِمُونَ ﴿٧٨﴾

79. Markaasuu u soo Baxay Qoomkiisii isagoo Xarragoon waxayna Dheheen kuwa Dooni Nolosha Dhaw Shallaytee Hadaan leenahay waxa la siiyey Qaaruun oo kale waa Nasiib wayn.

فَخَرَجَ عَلَىٰ قَوْمِهِۦ فِى زِينَتِهِۦ ۖ قَالَ ٱلَّذِينَ يُرِيدُونَ
ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا يَـٰلَيْتَ لَنَا مِثْلَ مَآ أُوتِىَ قَـٰرُونُ
إِنَّهُۥ لَذُو حَظٍّ عَظِيمٍ ﴿٧٩﴾

80. Waxayna Dheheen kuwii la Siiyey Cilmiga Magaciinba'ee Abaal marinta Eebaa u Khayr roon Ciddii Rumaysa oo Fasha Camal fiican lamana Waafajiyo hadalkaas Saabiriinta Mooyee.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ أُوتُوا۟ ٱلْعِلْمَ وَيْلَكُمْ ثَوَابُ ٱللَّهِ
خَيْرٌ لِّمَنْ ءَامَنَ وَعَمِلَ صَـٰلِحًا
وَلَا يُلَقَّىٰهَآ إِلَّا ٱلصَّـٰبِرُونَ ﴿٨٠﴾

81. Markaasaan la Goynay Isagii iyo Xoolihiisiiba Dhulka mana Helin Koox uga Gargaarta Eebe ka Sokow, mana Noqonin mid Gargaarta.

فَخَسَفْنَا بِهِۦ وَبِدَارِهِ ٱلْأَرْضَ فَمَا كَانَ
لَهُۥ مِن فِئَةٍ يَنصُرُونَهُۥ مِن دُونِ ٱللَّهِ
وَمَا كَانَ مِنَ ٱلْمُنتَصِرِينَ ﴿٨١﴾

82. Waxayna ahaadeen kuwii Doonayey Meejiisa Shalay inay Dhahaan

وَأَصْبَحَ ٱلَّذِينَ تَمَنَّوْا۟ مَكَانَهُۥ بِٱلْأَمْسِ يَقُولُونَ

waa Yaabe Illeen Eebaa u Waasiciyey Rizqiga Cidduu Doono oo Addoomadiisa ah kuna Cidhiidhya, Hadduusan Eebe Nagu Galladaysan wuxuu nala Goynlahaa (Dhulka) waa Yaab ma Liibaanto Gaalo.

وَيْكَأَنَّ ٱللَّهَ يَبْسُطُ ٱلرِّزْقَ لِمَن يَشَآءُ
مِنْ عِبَادِهِۦ وَيَقْدِرُ لَوْلَآ أَن مَّنَّ ٱللَّهُ عَلَيْنَا
لَخَسَفَ بِنَا وَيْكَأَنَّهُۥ لَا يُفْلِحُ ٱلْكَٰفِرُونَ ﴿٨٢﴾

Muxuuse ku Jawaabay markii la Waaniyey, wuxuu Sheegay in Xoolaha loo Siiyey Cilmigiisa iyo Wanaagiisa, Laakiin ha Ogaado in Eebe Halaagay hortiis Qarniyo ka Xoog badan kana Xoolo iyo Dad badan, Dambiilana lama Idan warsado, wuuse soo baxay Isagoo Xarragoon, markaasay Jeclaadeen kuwii Adduunka Doonayey inay isagoo kale Noqdaan, kuwiise Cilmiga lahaa waxay Dheheen Magaciisba‘ ee Wanaagga Eebe yaa u Fiican Ciddii Sama Fasha, Dhulkaase lala Gooyey Qaaruun iyo Guryihiisiiba wax u gargaarana ma helin'isna isuma Gargaarin, markaasay kuwii Jeclaa wixiisoo kale Shalay Dheheen Yaab weeyee Illeen Rizqiga wuxuu ku Jiraa Awoodda Eebe'Waasicin iyo Cidhiidhiba, waxayna Sheegeen in Haddaan Eebe u Naxariisan lala Goynlahaa dhulka, waxayna Ogaadeen Inayna Gaalo Liibaanayn.
Wana kaas Cidhibta Kibirka iyo Xoolaha sida Xun loogu Dhaqmo. Xooluhuse waa Wanaag Haddii Eebe laga yaabo oo lagu Samo Falo. Al-Qaṣaṣ (78-82).

---

83. Taasi waa Daartii Aakhiro waxaana u Yeelay kuwaan Doonayn isla Sarraynta (Kibirka) Dhulka iyo Fasaad, cidhibta (Fiicanna) waxaa leh kuwa Dhawrsada.

تِلْكَ ٱلدَّارُ ٱلْءَاخِرَةُ نَجْعَلُهَا لِلَّذِينَ لَا يُرِيدُونَ عُلُوًّا
فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فَسَادًا وَٱلْعَٰقِبَةُ لِلْمُتَّقِينَ ﴿٨٣﴾

84. Ciddii la Timaadda Wanaag wuxuu Mudan wax ka Khayr roon Ciddiise la Timaadda Xumaan lagama Abaal mariyo kuwa Xumaanta Sameeya, waxaan waxay faleen ahayn.

مَن جَآءَ بِٱلْحَسَنَةِ فَلَهُۥ خَيْرٌ مِّنْهَا وَمَن جَآءَ
بِٱلسَّيِّئَةِ فَلَا يُجْزَى ٱلَّذِينَ عَمِلُوا۟ ٱلسَّيِّـَٔاتِ
إِلَّا مَا كَانُوا۟ يَعْمَلُونَ ﴿٨٤﴾

85. Eebaha kugu Faral yeelay Quraanka wuxuu kuu soo Celin Meejii Ballanka (Qiyaamada ama Maka), waxaad Dhahdaa Eebahaybaa og ruuxii la Yimid Hanuun iyo kan ku Sugan Baadi Cad.

إِنَّ ٱلَّذِى فَرَضَ عَلَيْكَ ٱلْقُرْءَانَ لَرَآدُّكَ
إِلَىٰ مَعَادٍ قُل رَّبِّىٓ أَعْلَمُ مَن جَآءَ بِٱلْهُدَىٰ
وَمَنْ هُوَ فِى ضَلَٰلٍ مُّبِينٍ ﴿٨٥﴾

86. Mana Aadan ahayn mid Rajayn in lagugu soo dejiyo Kitaabka, Hasayeeshee waa Naxariista Eebahaa ee ha Noqonin mid u Kaalmeeya Gaalada.

وَمَا كُنتَ تَرْجُوٓا۟ أَن يُلْقَىٰٓ إِلَيْكَ ٱلْكِتَٰبُ
إِلَّا رَحْمَةً مِّن رَّبِّكَ فَلَا تَكُونَنَّ
ظَهِيرًا لِّلْكَٰفِرِينَ ﴿٨٦﴾

87. Yeyna kaa leexin Aayaadka Eebe intii lagugu soo Dejiyey ka Dib uguna Yeedh Xagga Eebahaa, hana ka mid noqonin Mushrikiinta.

وَلَا يَصُدُّنَّكَ عَنْ ءَايَٰتِ ٱللَّهِ بَعْدَ إِذْ أُنزِلَتْ إِلَيْكَ
وَٱدْعُ إِلَىٰ رَبِّكَ وَلَا تَكُونَنَّ
مِنَ ٱلْمُشْرِكِينَ ﴿٨٧﴾

88. Hana Caabudin Eebe la Jirkiisa Ilaah kale Eebbe mooyee Ilaah (kalana) ma Jiro, wax kasta wuu Halaagsami (Tagi) Eebe mooyee Xukunkana Isagaa iska leh, Xaggiisaana laydiin Celin.

وَلَا تَدْعُ مَعَ ٱللَّهِ إِلَٰهًا ءَاخَرَ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ كُلُّ شَيْءٍ
هَالِكٌ إِلَّا وَجْهَهُۥ لَهُ ٱلْحُكْمُ وَإِلَيْهِ تُرْجَعُونَ ٨٨

Aayadahanna waxay Sheegi in Daarta Aakhiro loo Yeelay kuwaan Iskibrin islana Waynayn, Xumaanna Dhulka Ku marin, Cidhibta Fiicanna waxaa Mudan kuwa Dhawrsada, Wanaagana Mid ka Fiican yaa lagu Abaal mariyaa, Xumaantana waxaa uun lagu Abaal Mariyaa waxay Fali Jireen.
Eebana wuxuu Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) U Yaboohay Wanaag iyo inuu meel Fiican u soo Celin ama Janada ha ahaato ama Mako ha ahaatee, Eebaana og Cidda Hanuunsan iyo Tan Baadida ah, Nabiguna ma Rajaynayn waxyi Intaan lagu soo Dejinin Quraanka. Gaalana wax loo Kaalmeeyo ma aha, iyo inay kaa leexiyaan Aayaadka Eebe inta lagugu soo Dejiyey, Gaalana wax laga mid Noqdo ma aha, Eebaana Xaq ah oo Xagiisa loo noqon, Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa hayeelee) wuxuu yidhi: Hadalka ugu Runsan ee Shaacir yidhi waa Hadalkii Labiid; wax kasta oo Ilaahay ka soo Hadhay way tagi. Suuradduna waxay soo Socoto oy marba hab u warantana waxay ku Dhamaatay: Inaan la Kibrin, Wanaagga la Falo, Eebe u soo Celin Nabiga Meel uu Jecelyahay, inaan Gaalo loo Kaalmayn, lana mid noqon, Eebe kaliyana la Caabudo, wixii ka soo hadhayna Tagi, xukunkuna isaga u ahaan, loona noqon isaga. Al-Qaṣaṣ (83-88).

# Suurat Al-Cankabuut سورة العنكبوت

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. waxay ku tusin mucjisada Quraanka (sida la soo sheegay.

الٓمٓ ١

2. ma wuxuu u maleeyey Dadku in loogaga tagi inay dhahaan waan rumeynay oon la imtixaamayn.

أَحَسِبَ ٱلنَّاسُ أَن يُتْرَكُوٓا۟ أَن يَقُولُوٓا۟ ءَامَنَّا وَهُمْ
لَا يُفْتَنُونَ ٢

3. dhab ahaan yaan u imtixaanay kuwii ka horreeyay, Eebana wuu muujin kuwii run sheegay, wuxuuna muujin kuwa beenlowga ah.

وَلَقَدْ فَتَنَّا ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَلَيَعْلَمَنَّ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ
صَدَقُوا۟ وَلَيَعْلَمَنَّ ٱلْكَٰذِبِينَ ٣

4. mise waxay u maleeyeen kuwii xumaanta samaynayey inay naga dheereyn (carari) waxaa xun waxay xukumi.

أَمْ حَسِبَ ٱلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّـَٔاتِ أَن يَسْبِقُونَا
سَآءَ مَا يَحْكُمُونَ ٤

5. ruuxii rajayn (ka cabsan) la kulanka Eebe, Ajashii Eebe (uu qadaray) way imaan, Eebana waa maqle oge ah.

مَن كَانَ يَرْجُوا۟ لِقَآءَ ٱللَّهِ فَإِنَّ أَجَلَ ٱللَّهِ لَءَاتٍ
وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلْعَلِيمُ ٥